

# Kobcinta daryeelka dadka reer Alberta ee la nool sonkorowga

Diseembar 16, 2024 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Dowladda Alberta ayaa ballaarineysa helitaanka qalabka kormeerka joogtada ah ee sonkorta (CGMs), taas oo u fududeynaysa dadka reer Alberta inay la socdaan oo maareeyaan cudurka sonkorowga.

Dowladda Alberta waxaa ka go'an inay hagaajiso helitaanka tiknoolajiyada caafimaadka si ay dadka reer Alberta uga caawiso maareynta caafimaadkooda si wanaagsan. Iyadoo qiyaastii 1.3 milyan oo reer Alberta ah ay hadda la nool yihiin cudurka sonkorowga iyo kuwa halista ugu jira (pre-diabetes), tiradaasna la filayo inay gaarto 1.7 milyan marka la gaaro 2034, ballaarinta helitaanka tiknoolajiyada caafimaad ee casriga ah ayaa hadda ka muhiimsan sidii hore.

Daboolista qalabka kormeerka joogtada ah ee sonkorta (CGM) ee carruurta ka yar 18 sano waxay bilaabatay Febraayo 2022, kaddib qiimeyn tiknoolajiyadeed oo caafimaad oo lagu ogaaday in carruurtu ay faa'iido weyn ka heli karaan tiknoolajiyadan. Iyada oo guushaas la sii xoojinayo, Alberta hadda waxay ballaarineysaa daboolista qalabka CGM si ay ugu faa'iideystaan dadka waaweyn ee buuxiya shuruudaha.

"Maareynta cudurka sonkorowga waxay noqon kartaa mid aad u walaac badan. Ballaarinta helitaanka qalabka kormeerka ee dadka reer Alberta waxay ka dhigi doontaa noloshooda mid fudud oo waxay yareyn doontaa culeyska dadka la nool sonkorowga."

*Adriana LaGrange, Wasiirka Caafimaadka*

Ballaarinta daboolista qalabka kormeerka joogtada ah ee sonkorta waa qayb muhiim ah oo ka mid ah ballanqaadka dowladda ee ah in dadka reer Alberta ay helaan tiknoolajiyada caafimaad ee ay u baahan yihiin. Tani waxay ka dhigan tahay in dhammaan dadka reer Alberta ee la nool sonkorowga una baahan noocyoo gaar ah oo daaweynta insuliinta, isla markaana ku jira qorsheyaasha caafimaad ee dowladda Alberta maalgeliso, ay heli karaan tiknoolajiyadan muhiimka ah.

Ballaarintani waxay fulinaysaa talo muhiim ah oo ka timid Kooxda Shaqada ee Sonkorowga (Diabetes Working Group), taas oo talo siisay dowladda Alberta si loo hagaajiyo nidaamka daryeelka sonkorowga ee Alberta.

Isticmaalka qalabka kormeerka joogtada ah ee sonkorta wuxuu yareeyaa ama baabi'inayaa baahida loo qabo isticmaalka suufka tijaabada sonkorta dhiigga. Dadka reer Alberta ee maalgelin ka hela qalabka kormeerka joogtada ah ayaa heli doona xadyo cusub oo la hagaajiay oo ku saabsan suufka

sonkorta dhiigga, si loogu isticmaalo marka loo baahdo. Dadka aan helin maalgelinta qalabkan waxay sii wadan doonaan xadka hore ee suufka sonkorta dhiigga.

Ballaarintani waa tallaabo weyn oo horay loogu qaaday Alberta, waxayna sare u qaadaysaa tayada nolosha kumannaan qof oo reer Alberta ah oo la nool cudurka sonkorowga. Iyadoo la fududeynayo helitaanka qalabka kormeerka joogtada ah ee sonkorta, dowladda ayaa xoojinaysa natijjooyinka caafimaad ee wanaagsan, isla markaana yareyneysa walbahaarka iyo culeyska maalinlaha ah ee la socota maaraynta cudurkan dabadheeraada.

## Xaqiiqooyin degdeg ah

- Qiyaastii 23,500 oo reer Alberta ah oo da'doodu tahay 18 sano jir iyo wixii ka weyn ayaa hadda u qalmi doona daboolista qalabka kormeerka joogtada ah ee sonkorta (CGM).
- Qalabka kormeerka joogtada ah ee sonkorta waa qalab akhriya heerka sonkorta dhiigga qofka daqiqad kasta, kaddibna macluumaadkaas u dira telefoonka casriga ah. Haddii loo baahdo, qofka ayaa qaadi kara tallaabo ku habboon si uu u kordhiyo ama u yareeyo heerka sonkorta dhiiggiisa.
- Maalgelinta labada sano ee ugu horreysa ee hindisahan waxaa bixiyay heshiiska Canada-Alberta ee lagu horumarinayo daryeelka caafimaadka.

## Wararka la xiriira

- Taageero dheeraad ah oo loo fidinayo carruurta reer Alberta ee la nool cudurka sonkorowga ([More support for Alberta children living with diabetes](#) (Feb. 3, 2022)

## Weydiimaha warbaahinta

[Jessi Rampton](#)

587-357-3729  
Xoghayaha Saxaafadda, Caafimaadka